

Iska fiiri.

Ogow

calaamadaha

Hore u ogaanshaha
Kansarka Waxay
badbaadin
kartaa
nolosha

Kansarka Mindhicirka

Kansarka mindhicirka waa nooca saddexaad ee ugu caansan kansarka. Baaritaanku wuxuu kaa caawin karaa ka hortagga kansarka mindhicirka ama ku ogaanshaha waqti hore, marka ay fududahay in la daaweeyo.

Calaamadaha



Dhiig ka soo baxa futada



Dareemida daal mar walba laakiin ma hubo sababta



Isbeddel ku yimaada caaddooyinkaaga saxarada. Waxaa laga yaabaa inaad aado marar badan ama ka yar ama aad qabtid shuban ama calool-istaag laga yaabo inuu yimaado oo tago.



Iska dhimista miisaanka laakiin ma hubtid sababta



Xanuun ama barar calooshaada ah

Haddii aysan wax caadi kuu ahayn adiga, la xiriir dhakhtarkaaga guud



Iskaan mari QR-ka si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah

Kansarka ilmo-galeenka

Kansarka ilmo-galeenka wuxuu inta badan saameeyaa haweenka da'doodu ka yar tahay 45 sano. Guud ahaan waxaa sababa infekshanka leh noocyada khatarta sare ee (HPV)

Calaamadaha



Dhiigbax aan caadi ahayn oo ka imaanaya xubinta taranka dumarka.



Dheecaan ka imaanaya xubinta taranka dumarka oo ur fiican lahayn



Daalka Joogtada ah



Isdhimista miisaanka ee aan la filayn



Dhiigbaxa caada istaaga ka dib



Xanuunka lugta/miskaha ah



Xanuun iyo raaxo la'aan inta lagu jiro galmada

Haddii aysan wax caadi kuu ahayn adiga, la xiriir dhakhtarkaaga guud



Iskaan mari QR-ka si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah

Kansarka naasaha

Qiyaastii 55,000 oo haween ah ayaa laga helaa kansarka naasaha sanad kasta ee dalka UK.

Calaamadaha



Kuus ama buro ee naasaha ah



Isbedelka iipta naaska oo gudaha gashey



Guduud iyo kuleyl



Maqaar dhuuduban ama godgodan



Bararka naasaha oo dhan ama qayb ka mid ah



Dheecaan dhiig leh



Buro ama kuus muuqda oo kilkisha saaran



Cuncunka maqaarka ama isbedelka tabashada

Haddii aysan wax caadi kuu ahayn adiga, la xiriir dhakhtarkaaga guud



Iskaan mari QR-ka si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah



Iska fiiri calaamadaha maanta. Kansarka waa la daaweyn karaa haddii la qabto waqti hore oo ku filan. Wixii macluumaad dheeraad ah, qaado buug yaraha ama iskaan mari QR